

Parent   
Aware



**Helitaanka Daryeelka  
Carruurta:  
Hagaha Qoysaska**





## Helitaanka Daryeelka Carruurta: Hagaha Qoysaska

Parent Aware waxay bixisaa ilo bilaash ah oo kaa caawiya sidii aad ku heli lahayd daryeelka carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada yaraanta ee ay carruurtaadu u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan dugsiga iyo nolosha.

Adiga ayaa khabiirka ah marka laga hadlayo ilmahaaga. Hagahan ayaa bixinaya tallaabooyin ku saabsan doorashada daryeelka, su'aalaha ay tahay inaad weydiiso barnaamijyada, iyo waxyaabaha aad u baahan tahay marka aad booqaneysid barnaamijyada daryeelka carruurta. Waxay kaloo la socda macluumaad dheeri ah oo ku saabsan daryeelka ilmaha iyo ku xirida ilaha waxtarka leh.

Haddii aad rabto inaad isticmaasho aaladdayada raadinta ee onlaynka ah ama inaad hesho caawimo raadineed oo shakhsi ah, **booqo [ParentAware.org](https://www.ParentAware.org) ama naga soo wac 888.291.9811**. Maalgelinta iyo taageerada macluumaadka ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota awgeed, aaladdayada raadintu waxay bixisaa macluumaadka ugu saxsan ee dhammaan barnaamijyada daryeelka carruurta shatiga heysta ee gobolka. Shaqaalahayaga aaminka ah waxay leeyihiin sannado khibrada daryeelka carruurta ah. Waxay ka jawaabi karaan su'aalahaaga, waxay kaa caawin karaan sidii aad usoo koobi lahayd raadintaada, waxayna kugu hagi karaan ilo kale oo qiimo leh.

ama naga soo wac 888.291.9811





## Ku saabsan Qiimeynta Parent Aware

Qoysasku way isticimaalaan **Qiimeynta Xiddigaha ah ee Parent Aware** si loo helo barnaamijyo isticmaala waxqabadyada carruurta u diyaariya dugsiga iyo nolosha.

Markuu barnaamijku ka qeybqaato hanaanka Qiimeynta Xiddigaha ah ee Parent Aware, waxay u oggolaanayaan inay xiddigoodu iftiimaan. Waxay ku tabarucaan tababar dheeraad ah iyo horumarin xirfadeed si ay uga gudbaan shuruudaha shatiga caafimaadka iyo amniga ee aasaasiga ah.

Barnaamijyada ka qeybgalaa waxay kasban karaan qiimeyn **Hal-, Laba-, Saddex-**, ama **Afar Xiddig ah**. Qiimeynta Parent Aware waxay ku saleysan tahay muujinta adeegsiga dhaqanada ku saleysan cilmi-baarista ee carruurta u diyaariya dugsiga iyo nolosha. Heer kasta oo qiimeyn ah wuxuu ku dhisnaanayaa kii hore, isagoo ka caawinaya qoysaska inay si fudud u aqoonsadaan dhaqanada uu barnaamijku adeegsanayo.

Ka baro waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan Qiimeynta Xiddigaha ah ee Parent Aware halkan [ParentAware.org/stars-defined](https://www.parentaware.org/stars-defined).





## Noocyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta

Waa muhiim inaad doorto barnaamij ku habboon adiga iyo ilmahaaga. Heerar ayaa jira si ay kuu hagaan marka aad go'aankan muhiimka ah qaadanaysid. Dhammaan barnaamijyada ka muuqda bogga internetka ee Parent Aware waa **kuwo shati ama shahaado heysta, ama ay buuxiyay heerarka ay dejisay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota**. Shati-siinta iyo shahaado-siintu waxay gacan ka geystaan hubinta in barnaamijyadu la kulmaan heerarka aasaasiga ah ee caafimaadka iyo amniga. Eeg [ParentAware.org/health-safety](https://ParentAware.org/health-safety).

Waxaad ku koobi kartaa raadintaada onlaynka qaybahaan: **Xarumaha iyo Dugsiyada Xanaanada, Daryeelka Ilmaha ee Qoyska, iyo Bilowga Hore.**

### Xarumaha iyo Dugsiyada Xanaanada

Barnaamijyadani waxay siiyaan daryeel iyo waxbarasho carruurta ku jirta kooxaha da'da ku dhisan, ha ahaato wakhti buuxa ama wakhti badhkiis. Barnaamijyadan ayaa inta badan ku jira dhismayaasha-madax-bannaan, meheradaha, xarumaha bulshada, ama goobaha cibaadada. Qeybtan waxaa sidoo kale ku jira barnaamijyada dugsiya barbaarinta carruurta ee dugsiya dadweynaha. Barnaamijyadan waxaa maamula Minnesota Department of Education (MDE). Dugsiyada dadweynaha, oo ay ku jiraan dugsiyada jaartarka, waxay bixin karaan waxbarashada carruurnimada hore, maalin la dheereysiiyay, akhriska qoyska, iyo/ama barnaamijyada u Diyaarsanaanta Dugsiya.

### Daryeelka Ilmaha ee Qoyska

Bixiyeyaasha daryeelka ilmaha ee qoyska ayaa laga yaabaa inay guryahooda ku daryeelaan dhallaanka, socod-baradka, carruurta xanaanada, iyo carruurta da'da dugsiya ku jirta. Qaar kamid ah barnaamijyada daryeelka ilmaha ayaa ku bixiya daryeelka goobaha ganacsiga ama goobaha cibaadada. Xirfadlayaal badan oo daryeelka carruurta qoyska ah waxay bixiyaan ciyaar iyo waxqabadyo qorsheysan oo carruurta ka caawiya barashada.

### Bilowga Hore

Bilowga Hore ee Yaraanta (dhalashada kahor ilaa da'da 3) iyo Bilowga Hore (da'da 3 ilaa 5) iyo shuraakadooda daryeelka carruurta waxay u adeegaan carruurta yar yar ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Barnaamijyadu waxay ku saleysan yihiin xarumaha, dugsiyada, ama guryaha daryeelka carruurta ee qoyska. Barnaamijyadani waxay leeyihiin adeegyo dhammaystiran oo taageeraya maskaxda, bulshanimada, iyo koritaanka shucuurta ee carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da 5. Intaa waxaa dheer, barnaamijyadu waxay bixiyaan fasalo carruurnimada hore iyo adeegyada caafimaadka iyo bulshanimada.

Noocyada kale ee daryeelka ilmaha waxaa kamid ah barnaamijyada daryeelka da'da dugsiya, barnaamijyada galitaanka, iyo daryeelka ay bixiyaan qoyska, asxaabta, ama derisku. Barnaamijyadan ayaan shati ama shahaado heysan kamana muuqdaan natiijoyinka raadinta ee Parent Aware.



## Bixinta Lacagta Xanaanada Carruurta

Caawimada maaliyadeed iyo qorshayaasha dejinta cashuurta ayaa kaa caawin kara bixinta lacagta daryeelka ilmaha.

Qiimaha daryeelku wuxuu ku xiran yahay dhowr arrimood, oo ay ku jiraan da'da ilmahaaga, nooca daryeelka ilmaha, iyo goobta. Waxaa jira barnaamijyo dhowr ah oo kaa caawin kara ka dhigista daryeelka carruurta mid la awoodi karo.

Kuwaas waxaa kamid ah:

- **Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP)**
- **Deeqda Waxbarashada Yaraanta**
- **Dhibcaha iyo ka jarista cashuurtaada dakhliga**

Waxaad wici kartaa **888.291.9811** si aad u hesho caawinada raadinta ilaha saxda ah. Ama, waxaad isticmaali kartaa:

- Aaladda bilaashka ah ee baaritaanka taageeraada maaliyadeed ee **Bridge to Benefit** si aad u ogaato haddii aad u qalanto caawimaad. Tag bogga [mn.bridgetobenefits.org/Home2](https://mn.bridgetobenefits.org/Home2).
- **Lacag Bixinta Liistada Hubinta Daryeelka** sida hage kaalmada dhaqaale. Tag bogga [ParentAware.org/paying-for-care-checklist](https://ParentAware.org/paying-for-care-checklist).
- Caawinaada lacag la'aanta ah ee xareynta **canshuur celinta** sidoo kale waxaa laga heli karaa bulshooyin badan. Tag bogga [revenue.state.mn.us/free-tax-preparation-help](https://revenue.state.mn.us/free-tax-preparation-help).



## Ilaha Qoysaska leh Baahiyo Daryeel oo Gaar ah

Waalidiinta carruurta leh baahiyo gaar ah, qoysaska LGBTQ, iyo waalidiinta dhallaanka iyo socod-baradka ayaa qabi kara walaac dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka daryeelka ilmaha. Kheydaarkan ayaa caawin kara.

- Qoysaska carruurta leh **baahi gaar ah** waxay adeegsan karaan hagahayaga si u helaan adeegyada iyo daryeelka carruurta si looga caawiyo in carruurtoodu koraan oo ay u kobcaan. Tag bogga [ParentAware.org/special-needs](https://www.parentaware.org/special-needs).
- **Qoysaska LGBTQ** laga yaabaa inay qabaan walaac dheeraad ah iyo tixgelinta si loo helo daryeelka ilmaha oo xasaasi ah ixtiraamna leh. Hagahayaga ilaha ayaa caawin kara. Tag bogga [ParentAware.org/lgbtq-families](https://www.parentaware.org/lgbtq-families).
- **Kheyraadka Qabiilka ee Daryeelka Carruurnimada Hore ee Minnesota (MNTRECC)** waxay siisaa daryeelka yaraanta iyo ilaha waxbarashada carruuta Hindida Mareykanka ah iyo qoysaskooda. Tag bogga [mntrecc.net/contact.html](https://www.mntrecc.net/contact.html).
- Waalidku raadinaya barnaamijyo **laba luuqadle ah** ama ku hawlgala **luuqado aan Ingiriisi ahayn** waxaad ka heli kartaa macluumaadka luqadda liistada barnaamijka ee Parent Aware.



## **Doorashada Liistada Hubinta Daryeelka U Helida Barnaamij Ilmahaaga**

- 1 Bilow Raadintaada**
- 2 La Xiriir**
- 3 Hubi Tixraacyada iyo  
Diiwaannada**
- 4 Booqo Barnaamijyada**
- 5 Samee Doorashadaada**
- 6 Ka Caawi Ilmahaaga  
Marxaladda Kala-Guurka**
- 7 Ka Qeybqaado**




1

## Bilow Raadintaada

U adeegso aaladdayada raadinta onlaynka ah ee ku taala [ParentAware.org](https://www.ParentAware.org) si aad uga doorato in ka badan 12,000 daryeelka carruurta ee shatiga leh iyo barnaamijyada waxbarashada yaraanta ee Minnesota.

- Beddel aasaaska sida goobta, saacadaha shaqada, iyo da'da loo adeegay si aad u hesho natiijooyin kuu gaar ah.
- Barnaamijyada qaar waxay sidoo kale wadaagaan boosaska iyo sicirada hadda jira.



*Caawinaada shaqsiyadeed waxaa la heli karaa adigoo wacaya 888.291.9811 ama adigoo adeegsanaya qeybta wada-sheekaysiga ee bogga internetka.*

2

## La Xiriir

Kadib markaad aqoonsato barnaamijyada suurtagalka ah, wac si aad u hubiso furitaannada oo aad u ogaato in qiimaha iyo jadwalka ay dabooli doonaan baahidaada. Tani waa fursad weyn oo aad naftaada ku soo bandhigi karto oo aad ku weydiin karto su'aalo, gaar ahaan haddii ilmahaagu leeyahay baahi gaar ah.

- Ma bixiyaan wakhti badhkiis ama jadwal la beddeli karo (haddii loo baahdo)?
- Ma bixiyaan wax kaalmo dhaqaale ah sida deeq waxbarasho, qiimo dhimista carruurta badan, ama sicirka khidmadda la dhimayo?
- Ma u baahan yihiin deebaaji?

3

## Hubi Tixraacyada iyo Diwaannada

- Ka codso tixraacyo qoysaska waqtigan adeegsada barnaamijka ama kuwa hore u adeegsaday barnaamijka waqtiyadii la soo dhaafay.
- Adeegso raadinta shatiga ee gobolka ([licensinglookup.dhs.state.mn.us](https://licensinglookup.dhs.state.mn.us)) si aad u hubiso in barnaamijku yahay mid shati heysta ama shahaado heysta oo hubi wixii xadgudub caafimaad ama badbaado ee hore u dhacay ama immika jira iyo ammarada sixida.
- Macluumaadka shati-siinta ee barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoyska, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa xafiiska adeegyada bulshada ee degmadaada. ([mn.gov/dhs/general-public/about-dhs/contact-us/counties-and-regional-offices/](https://mn.gov/dhs/general-public/about-dhs/contact-us/counties-and-regional-offices/))

*Caawinta hanaankan ayaa la heli karaa adigoo wacaya 888.291.9811.*

4

## Booqo Barnaamijyada

Waxaad u baahan kartaa inaad marka hore jadwal u sameysato daawasho kadibna aad booqasho labaad sameyso si aad u barto ilmahaaga oo aad u arragto sida ay ula macaamilaan daryeelaha iyo carruurta kale.

Bogaga soo socdaa waa qaar kamid ah qodobbada aad isticmaali karto si ay kaaga caawiyaan isbarbardhiga barnaamijyada daryeelka carruurta.

# Booqo Barnaamijyada

**XIRIIRADA.** Maskaxda carruurta waxay si fiican u horumartaa marka ay daryeel iyo xiriir joogto ah la leeyihiin daryeelayaasha.

**Su'aalaha:** Waa maxay xaddiga shaqo ka tagida ee dadka daryeela carruurtayda?

Sidee ayaad ula macaamishaa habdhaqanka adag?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Dadka waaweyni waa inay noqdaan kuwo si joogto ah u dhaqma, naxaariis iyo dulqaadna leh, isla markaana garanaya waxa ay carruurta jecel yihiin iyo waxa ay neceb yihiin. Waa inay waqti ku qaataan la hadalka iyo dhageysiga ilmo kasta. Barayaasha hore waa inay habdhaqanka adag ula macaamiilaan qaab wanaagsan, halkii ay ku qaylin lahaayeen ama ciqaabi lahaayeen carruurta.

**AQOONTA IYO WAAYO-ARAGNIMADA.** Barayaasha carruurnimada hore ee leh aqoonta iyo waayo-aragnimada carruurnimada hore ayaa leh faham wanaagsan oo ku saabsan baahiyaha koriinka ee carruurta yaryar.

**Su'aalaha:** Adiga (iyo/ama shaqaalahaagu) miyaad fahantaan horumarka ilmaha isla markaana leedihiin waxbarasho iyo tababar gaar ah?

Immisa sanno oo khibrad ah ayaad leedahay/ayay leeyihiin?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Bixiyeyaasha xanaanada carruurta ee shatiga heysta waxa looga baahan yahay inay dhammeystiraan tababar sannadle ah. Barnaamijyada ay Qiimeysay Parent Aware iyo kuwa kale ee heysta aqoonsiga qaranka ayaa dhameystira tababar dheeraad ah sannad kasta. Barayaasha carruurnimada hore waxay sidoo kale lahaan karaan shahaadooyin ama aqoonsiyo la xiriira Waxbarashada Carruurnimada Hore ama qeybaha la xiriira.

**XADDIGA KOOXDA.** Carruurta lagu daryeelo qaab kooxo yaryar ah ayaa heli kara dareenka ay uga baahan yihiin dadka waaweyn.

**Su'aalo:** Immisa carruur ah ayaa la daryeeli doonaa marka lagu daro ilmahayga?

Maxay yihiin siyaasadahaaga kormeerka ee hawlaha gudaha iyo dibadaba?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Xaddiga kooxda ee daryeelka carruurta ee shatiyeysan\* waxa kormeera Gobolka Minnesota. Tirada carruurta ee uu qofku sharci ahaan xanaaneyn karo waxay ku xiran tahay da'da carruurta; carruurta da'da yar waxay u baahan yihiin daryeel dheeraad ah.

**CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA.** Jawi aamin ah oo nadiif ah ayaa taageera caafimaadka ilmaha. Dhammaan barnaamijyada shatiyeysan waxa looga baahan yahay inay buuxiyaan heerarka aasaasiga ah ee caafimaadka iyo amniga.

**Su'aalaha:** Miyaa la baaray taariikh dambiyeedka dhammaan bixiyeyaasha daryeelka ilmaha?

Ma jiraa qorshe degdeg ah oo loogu talagalay xaaladaha sida cimilada daran, dabka, iyo daadadka?

Ma jiraan goobo seexasho oo loogu talagalay dhallaanka oo waafaqsan shuruudaha hurdada badbaadada leh\*\*?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Goobta barnaamijka waa inay ahaataa mid nadiif ah oo soo jiidasho leh, oo leh alaabta carruurta ku ciyaarto, qalab, iyo buugaag si fudud loo heli karo oo xaaladdooduna wanaagsan tahay. Waa inay jirtaa meel loogu talagalay ciyaarta firfircoon, qalabka ciyaartana waa inay xaaladiisu wanaagsan tahay oo ay dulsaaran yihiin dul jilcsan oo ka sameysan ciid, caleemo, ama caag.



**WAXQABADYADA QORSHEYSAN.** Lahaanshaha waxoogaa waxqabadyo qorsheysan iyo hawl maal-meedka caadiga ah waxay ka caawisaa carruurta inay dareemaan aamin waxaanay taageertaa kobocooda.

**Su'aalo:** Maxay u egtahay maalinta caadiga ah?

Barnaamijku waligiis miyuu baxaa safaro waxbarasho ama waxqabadyo kobcin ah?

Intee jeer ayaa ilmaheyga loo akhriyaa?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Waa inay jiraan waxqabadyo badan oo kala duwan oo carruurta loogu talagalay, sida sheeko waqti, heeso, ciyaaro, ciyaarta labiska, qalabka dhismaha ee carruurta, iyo wakhtiga banaanka. Barnaamijyada qaar waxay adeegsadaan manhaj; kuwa kale ma isticmaali karaan manhaj rasmi ah laakiin waxay wali u taageeraan u diyaarsanaanta carruurta ee fasalka barbaarinta siyaabo badan.

**LA SOCO HORUMARKA.** Qiimeynta joogtada ah ee koritaanka ilmaha ayaa kaa caawin karta in la garto waxa ay yihiin awoodaha iyo caqabadaha.

**Su'aalaha:** Sidee loo cabiraa horumarka ilmaha?

Maxaa ka dhaca shirarka waalidiinta?

**Maxaad u Baahan Tahay:** Barnaamijku wuxuu adeegsan karaa aalad qiimeyn si ilmahaaga loogu hago waxqabadyo gaar ah. Barnaamijyada loogu talagalay barbaarinta carruurta waxay kaloo lahaan karaan waxqabadyo ka caawiya u gudbida xanaanada.

**IXTIRAAMKA DHAMAAN QOYSASKA.** Barnaamijyadu waa inay wax ka qabtaan eexda isla markaana taageeraan dhaqamada dhammaan qoysaska.

**Su'aalo:** Ilmahaygu ma arki doonaa afkooda iyo dhaqankooda oo ka muuqanaya agabyada barnaamijka, caruusadaha, iyo buugaagta?

Ma jiraan waxyaabo la heli karo oo carruurta ka caawiya inay waxka bartaan dadka ka yimid dhaqammo kala duwan?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Barayaasha carruurnimada hore waa inay ixtiraamaan taariikhda gaarka ah ee ilma kasta. Waxqabadyada waxka bara waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin ee lagusoo bandhigo qaabab xaqiiq ah, wanaagsan ayaa carruurta ka caawiya barashada qiimeynta iyo ixtiraamka naftooda iyo dadka kale.

**XIRIIRKA.** Waaliddiinta iyo barbaariyayaasha yaraanta waa inay maalin walba carruurta weydiiyaan xaalkooda. Carruurta si joogto ah ayay u koraan isuna beddelaan, sidaa darteed wadaagida macluumaadku waa muhiim.

**Su'aal:** Sideed ugu sheegtaa macluumaadka waalidiinta?

**Waxa ay Tahay Inaad Eegto:** Carruurta si joogto ah ayay u koraan isuna beddelaan, sidaa darteed wadaagida macluumaadku waa muhiim. Boodhadhka ogeysiiska, qoraalada, ama wada hadalka dhamaadka maalin walba ayaa dhammaantood ah wadooyinka barnaamijku uu wax kugula socodsiin karo.



**5**

## Samee Doorashadaada

Hubso inaad ku xaqiijiso taariikhda aad bilaabeysa barnaamijka aad dooratay oo buuxi wixii waraaqo ah ee la dalbado.

**6**

## Ka Caawi Ilmahaaga Marxaladda Kala-Guurka

Weydii barnaamijka wax ku saabsan tallaabooyinka ay kula talin lahaayeen ilmahaaga ama adeegso Liistada Hubinta Kala-guurka si aad u hesho fikrado. Tag bogga [ParentAware.org/transition-checklist](https://www.ParentAware.org/transition-checklist).

**7**

## Ka Qeybqaado

Adiga ayaa ah garsoorka ugu wanaagsan ee qiimeyn kara haddii barnaamij uu anfacy ilmahaaga. Markay carruurtu koraan, baahiyahooduna way isbeddelaan. Barnaamijyadu sidoo kale way isbeddali karaan waqti kadib. Tani waa sababta ay muhiimka u tahay in si joogto ah loo qiimeeyo xulashada daryeelkaaga.

Waa kuwaan qaar kamid ah qaabab aad uga qaybqaadato ulana socoto.

### Samee booqashooyin lama filaan ah

Barnaamijyadu waa inay soo dhaweeyaan booqashada waalidiinta wakhti kasta, laakiin maskaxda ku hay in waqtiyo kamid ah maalintii ayaa mashquul badan.

### Qaado waqtigaaga

Markaad keenaysid ama aad qaadeysid ilmahaaga waqti ku bixi inaad mararka qaar waqti yar sii joogtid.

### Beddel waqtiyada

Qaadista ilmahaaga waqti isku mid ah maalin kasta waa hab wanaagsan oo aad ilmahaaga ugu dhisi karto jadwal joogto ah. Si kastaba ha noqotee, beddelida waqtiyada qaadida marmarka qaarkood waxay kuu oggolaaneysaa inaad arragto dhinacyo kala duwan oo maalinta ilmahaaga ah.

### Mutadawac

Caawinta dhacdooyinka khaaska ah ama safarrada waxbasrasho waa hab xiiso leh oo lagula xiriiro ilmahaaga sidoo kale waa fursad aad kula macaamili kartid daryeelayaasha ilmahaaga.

### Diyaari shir

Sameynta kulan ama wada sheekeysiga taleefanka ayaa ah fursad looga hadlo ilmahaaga, lagu weydiiyo su'aalo, ama lagu muujiyo waxyaabaha aad ka welwelsan tahay.

### Lagula kulmo dad cusub

Lagu barto xirfadlayaasha daryeelka ilmaha, shaqaalaha, ama mutadawaciinta laga yaabo inay waqti la qaataan ilmahaaga.

## Miyaad Dhibaato Ka Qabtaa Helitaanka Daryeel?

Helitaanka daryeel tayo sare leh, oo daryeelka carruurta ah oo la awoodi karo ayaa ku adag bulshooyin badan.

Halkan waxa ku yaala talo bixino dhawr ah oo laga yaabo inay ku caawiyaan:

- La xiriir **Khabiiradayada Macluumaadka Daryeelka Ilmaha** si aad u hesho fikrado dheeri ah. Wac 888.291.9811.
- Fiiri **goobo kala duwan** ka bilow meeshii aad markii hore ka fiirsatay. Laga yaabaa inay jiraan xulashooyin waddo ka duwan oo shaqada lagu tago, ama meel ka fog guriga.
- Ku biir **liiska sugitaanka** ee barnaamij kasta oo aad xiiseynayso. Mararka qaar boosas ayaa si lama filaan ah usoo baxa.
- **La hadal asxaabta**, deriska, waalidiinta kale, iyo dadka aad wada shaqeysaan ee muddo dhawayd raadiyay daryeel carruur. Maxay sameeyeen?





Parent   
*Aware*

**ParentAware.org | 888.291.9811**

10 River Park Plaza, Suite 820, St. Paul, MN 55107